



Xafiiska Senator Abshir Axmad
WARSAXAAFADEED 01/2016

**Dawlad Goboleedka
Galmudug**

December 31, 2016

Faafin Degdeg Ah

Senator Abshir Axmad Oo Iska Casilaya Gudoomiyenimadii Goobjoog Media Group

Ugu horeyn, waxaan jeclahay inaan u mahadceliyo mudanayaasha Baarlamaanka Galmudug maadaama ay ii doorteen mudanihii Aqalka Sare ee ugu horeeyay oo ay Soomaaliya taariikhdeeda yeelato. Sharaf weyn ayeyna ii tahay in aan ku metalo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed. Doorashadeyda waxay bilaaw u tahay safar dheer oo horusocod iyo barwaaqo u ah dalkeyga iyo dadkeyga.

Afar (4) sano ka hor, waxaan aasaasay mid ka mid ah warbaahinta ugu caansan uguna madaxbannaan gayiga Soomaaliyeed oo lagu magacaabo Goobjoob Media Group. Laga soo bilaabo furitaankeedii, waxaan ku dhabar adaygay in aan ka dhigno Goobjoog mid ka mid ah warbaahinta loogu xushmeyn badan yahay Soomaaliya, inaga oo ku xireyna muwaadiniinta Soomaaliyeed dowladda, bulshada rayidka iyo bulshada caalamka intaba. Sidaas darteed waxaan u tixgeliyaa hoygaan warbaahineed, iyo dhamaan dadaalka weyn oo ay shaqaaleheeda ugu jiraan in ay u dhisaan dadka Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibadda dal wanaagsan - mid aad ugu dhow qalbigayga.

Si kastaba ha ahaatee, isbedelku waa lama huraan, waxaana yimid waqti ay tahay inuu dhaco kala wareeg ama kala guur shaqo. Sidaan horay u soo sheegay, xilkeyga cusub ee ah mudanaha Aqalka Sare ee Soomaaliyeed oo aan ku metalayo dawlad goboleedka Galmudug ayaa i saaraya mas'uuliyad xoogan taasoo ah in aan ka soo dhalaalo iyo in aan ka shaqeeyo hirgelinta danaha dalkeyga iyo danta dadka aan metalo ee Galmudug.

Sidaa darteed, maanta waxaan iska casilayaa kana degayaa xilka Madaxa Ugu Sareeya (ama CEO-ga) ee Goobjoog Media Group si aan xooga u saaro kaalinteyda ah mudane Aqalka Sare. Runtii ma ahayn go'aan fudud in aan ka tago ka shaqaynta hawl maalmeedka warbaahinta Goobjoog Media Group anigoo tixgelinaya kaalinta lafdhabarka ah oo ay ka ciyaarto arimaha lama huraanka u ah dadkeena iyo dalkeena. Balse waxaan ka mid ahaan doonaa Board-keeda si aan uga qaybqaato talosiin iyo tusaaleyn maamuleed markii la iiga baahdo, balse lug kuma lahaan doono mana faragelin doono faafreebka siyaasadeed ee laamaha Goobjoog.

Keliya in aan ahaado xubin ka tirsan Board-ka Goobjoog Media Group, waxaan uga gol leeyahay ka fogaanshaha isku dhaca shaqooyinkeeda iyo hawlmaalmeedka xilkeyga cusub si aan u xaqiijiyo in Goobjoog Media Group ay ula jaanqaado heerarka caalimaga ah ee warbaahinta caalamka.

Sidoo kale, waxaan u heelanahay taageerista iyo kobcinta hay'ahadaha warbaahineed ee dalka Soomaaliya waxaana kaalinteyda mudane Aqalka Sare u adeegsan doonaa in aan horumariyo

warbaahinta dalka aniga oo u maraya dhinaca sharci dejinta. Soomaaliya waxay cagta saartay horumar ah dhanka dhaqaalaha iyo dhinaca nabada, taasna waxaa udubdhexaad u ah warbaahinta dalka ka jirta. Sidaas darteed waa lama huraan in warbaahintu ahaato mid dhexdhexaad ah markay ka hadleyso danaha dadka.

Hadaba, waxaa ila socon doona xusuustii lama ilaawaanka ahayd ee waqtigeeygii Goobjoog Media Group, waana ku faraxsanaan doonaa saaxiibtinimadii aan halkaas ka dhaxlay. Marwalba waan tixgelin doonaa kuwii aan dhiirrigeliyey ama wax iga kororsaday, iyo casharadii aan ka bartay iyaga iyo dhaliilahooda intaba. Waxaan u mahadcelinayaa dhamaan dadkii i gacansiyyey waqtiyadii adkaa iyo sidoo kale dadkii ila wadaagay waayihii wacnaa.

Si wadajir ah aan si adag u shaqayno si aan dhisno Soomaaliya oo sidaan ka wanaagsan.

Mahadsanidiin.

Wixii faafhfaahin dheeraad ah kala xiriir: Maxamed Ciise ✦ Phone: +252615700005